Waxaan nahay xisbiga rajada.
Nagu soo biir oo isbadel samey.

Caawintaada waa loo baahanyahay – noqo xubin
Swish **SEK 100** ee **123 336 00 70** oo sheeg magacaaga iyo lambarka aqoonsiga gaarka ah.
Ama ku soo biir moderaterna.se/bli-medlem

Codkaaga kudarso
mustaqbal rajo leh.

nya m MODERATERNA

Ulf Kristersson
Musharaxa Ra'iisulwasaaraha

nya m MODERATERNA

Waxaa soodhaw Waqtiga
Doorashada Guud

Waxaan ku dadaaleynaa Swiidhan oo ku sifeysan ganacsi, sinnaan iyo dhaqdhaqaaqa bulshada, halkaasoo jiil walboo cusub uu kahelaayo fursado lagu qaabeeyo nololahooda gaarka ah, aysana kaliya raacin wadadii ay raaceen waalidiintood.

Iswiidhan waa wadan cajiib ah, laakin iskama indhitiri karno dhibaatooyinka muuqda e jira. Dhaqaalaha Iswiidhan wuu barwaaqeysanyahay, laakin bulshadeenu sidii larabay uguma sina. Inkastoo uu jiro kobac dhaqaale, tiro siikordhaysa oo dadka aysan usuurangalayn inay galaan suuqa shaqada, shaqo la'aan waqti dheer ayaa kaceyso, oo waxay qaadataa sideed sanno in muhaajir kale ee ku nool Iswiidhan ay shaqo helaan. Isla waqtigaas, shirkadaha way ka tagayaan wadanka. Aagaga nugul waxay la dhibaatoonayaan dambiga gangistariinta la xiriiro iyo toogashooyin. Cabsi iyo amni la'aan ay dareemayaan muwaadiniintu muwaadaniinta waxay gaartay hakii ugu saraysay mudo toban sanno ah. Waqtiyada sugitaanka daryeelka caafimaad waxay ku labo jibaarantay sadex sanno iyo daryeelka dhalmada ilmaha ee wadanka oo dhan ah waxay ku xirantahay yaraanshaha shaqaalaha iyo ku filnaan la'aan. Ku dhawaad hal shantii arday kama tago fasalka sagaalaad oo ay la jiraan buundada baasitaanka.

Ganacsiga Iswiidhan iyo warshadaha waxay ku jiraan tartan oo weyn, laakin siyaasada dowlada waxaa lagu hogaamiyaa jahada qaldan. Dhoor go'aamo ayaa lagu wiiqayo sharuudaha ganacsiga iyo shaqada ee Iswiidhan. Canshuuraha lagu kordhiyay ganacsiyada yaryar iyo caymiska RUT ee loo celiyo canshuur bixiyaasha oo hoos loodhigay. Canshuurta dalxiiska la soo jeediyay' waa tusaalaha ugu dambeeyo ee siyaasasadahahalista gelinaayo ganacsiga, milkiilonimada iyo ganacsiga. Tani waa wax aan Iswiidhan awoodin. Jiilka sooscda ee shirkadaha muhiimka ah ee Iswiidhan waa inay maanta kobac sameeyaan.

Sare u kaca dhaqaalaha waa la dharbaaxay. Balamaha la xiriiro isticmaalka ugu weyn wuxuu mugdi gelinayaa dib u habeynta muhiimka ah ee Iswiidhan u baahantahay. Maysan jirin Wasiirka Dhaqaalaha tan iyo 1970s kaas oo keydiyay wax yar inta lagu jiray sare u kaca dhaqaalaha sida wasiirka masuulka ah – iyo halisahaan burburinayo dhaqaalaha bulshada.

Maxaa ku dhacayo shaqooyinka, daryeelka iyo amniga dhaqaalaha markii hoos u dhaca dhaqaalaha imaado?

Waxaan u qaadanaa dhibaatooyinka waqtigeena mid dhab ah. Waa qaabka kaliya aan u dhisi karno mustaqbal rajo u leh Iswiidhan.

Qiyamyadeena waxay kudhisanyihiin labadaba xoriyada shaqsiga iyo masuuliyad wadareedka. Isha xoriyada, madax banaanida iyo isku tiirsanaanta shaqsiga waa yeelashada daqli gaar ah. Xeerarka bulshada oo wanaagsan iyo dib u qeybinta hantida oo cadaalad ah kuma ahan canshuuraha sare ee jiray iyo kaalmooyinka ka badan. Waxay ku saabsantahay hubinta in carruur badan ka qeybgasho dugsiga hore, in dhalinyaro badan ay u suurtogaleyso inay buuxiyaan filashooyin sareeyo oo si wanaagsan dugsiga ugu sameeyaan, ee dad weyn oo badan ay helaan shaqo oo ay is taageeraan. Waqtiga ay qaadato in muhaajir cusub noqdo shaqaale cusub waa in la soo gaabiyaa.

Sidaas darteeda, shaqeynta waa inay marwalba ahaataa mid aad uga faa'ido badan ku noolaanshaha kaalmooyinka dowlada. Ganacsataad waxay ka mahadcelin karaan wax ka badan inta la canshuuray, iyo xoriyada iyo saboolnimada waa in la difaacaa. Waa inaan illaalinaa nuxurka amniga bulshada: daryeelka caafimaadka, waxbarashada iyo dugsiga hore. Waa inaan tallaabo adag kaqaadnaa fal dambiyeedyada. Shaqooyinka ugu muhiimsan ee gobolka waa inuu xooganaadaa, haddii kale bulshada waxay noqonaysaa mid liidata.

Waxaan nahay codkaaga ee mustaqbal rajo leh.

Ulf Kristersson
Hogaanka Xisbiga

Mstaqbal rajo uleh Iswiidhan

Isdhaxgal wanaagsan
- Shaqooyinka dadka biloowga ah iyo heerka shaqada oo aad usaramara.
- Kaalmooyin xadidan si loo hubiyo in shaqeynta ay marwalba aad uga faa'ido badantahay deeqaha daryeelka.
- 'In masuuliyad lagu saaro' dhammaan muhaajiriinta cusub ee dadka waawayn ah inay bulshada dhexgalaan.
- Sharuudaha luuqada ee muwaadannimada.

Shaqeynta waa inay faa'ido lahaataa
- Daqli badan oo la tuuri karo, canshuuro hooseeyo ee daqliyada hoose iyo caadiga ah.
- Macalimiinta iyo kalkaalisooyinka loogama baahanayo inay bixiyaan canshuurta daqliga gobolka.
- Qiimooyinka hoose ee howlgabyada iyo waayeelka shaqeynayo.
- Sharuudo wanaagsan ee shirkadaha u guurayo Iswiidhan, kama imaanin.

Maalgelinta ugu balaaran ee Booliska Iswiidhan ee in ka badan 20 sanno
- Saraakiil boolis oo badan qaatana mushaarada sareeyo.
- Dambiyo badan ee la baarayo iyo dacwada badan ee la xirayo – nidaamka maxkamada oo xoogan.
- Tallaabaad shirkada ee ka soo horjeedo dambiga gangistiriinta.
- Ciqaab xun iyo xukumid.

Helitaanka daryeelka caafimaadka oo wanaagsan
- Waxqabadka la sadex jabaaray ee ku saleysan magdhowga (Kömiljard) in la yareeyo waqtiyada sugitaanka daryeelka caafimaadka.
- Xoojinta racfaanka shaqooyinka daryeelka caafimaadka.
- Sharuudaha tayada cad iyo dabagal wanaagsan.
- Shaqooyin badan waxay siiyaan illo badan daryeelka caafimaadka.

Ardayda waxay baranayaan wax badan
- Kordhi barida saacad dheeraad ah maalintiiba.
- Waxbarashada qasabka ah ee la kordhiyay oo illaa da'da 18 ee kuwa aan gaarin shahaadooyinka dugsiga sare.
- Masuuliyada qaranka ee lagu celinayo hormarinta xun ee ku guuldareysiga dugsiyada.
- Macalimiin badan oo ay la jiraan mushaaro sareeyo, gaar ahaan aagaga nugul.